# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

## Kal-fadhigii 33aad Fadhigii --aad

**Isniin03/04/2017**

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:23 AM**

**Gudoomiyaha:-** Baashe Maxamed Faarax

**Quraan:- Xildibaan Xuseen Ismaciil Yuusuf.**

**Ajendaha Fadhiga:-**Warbixinta Wasiirka Macdanta iyo Tamarta ee Mashaariicda Sharci Shidaalka iyo Macdanta

**Gudoomiyaha: -**Mudanayaal waxaa ina horyaal saddex Xeer oo kala ah Xeerka Shidaalka, Xeerka Dakhliga Shidaalka iyo Xeerka Macdanta, saddexdaas Xeer in badan bay Golaha yaaleen, waxaanu u yeedhnay Wasiirkii Macdanta oo Maanta ka warbixinaya, ka dibna Mudanayaal waynu soo akhrisnaynaa hadii aynu u baahano wax su'aallo ah waynu u yeedhaynaa oo manta warbixinta uun baynu ka dhageysaneynaa wax su'aalo ah la waydiin mayo.

Xogheyntu Xeerarka Mudanayaasha ha u qaybiyaan, Xildhibaanadu ha fadhiistaan, Waxaana ku soo dhoweynayaa Wasiirka Macdanta iyo Tamarta Md. Eng. Xuseen Cabdi Ducaale, Wasiir ku soo dhowow Warbixinta.

**Wasiirka Macdanta iyo Tamarta Eng. Xusen Cabdi Ducaale:-** Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, Wakiilada sharafta leh ee Golaha, Xoghayaha Guud iyo bahda saxaafada waan idin salaamayaa marka hore, sharaf bay ii tahey inaan manta idin hor imaado, sababta aanu idiinku nimina waxa weeye inaanu first reading sameyno ama gogol-dhig idinka siino saddex sharci ama qabyo qoraal sharci oo muddo golaha yaaley, saddexdaas sharci oo la idiin qaybiyay manta waxay ku saabsan yihiin oo ka kooban yihiin xeerkii sahminta shidaalka, Xeerkii Dakhliga Shidaalka iyo Xeerkii Macdanta waa saddexaas Xeer.

Anagoo ka duuleyna Qodobka 12aad ee Dastuurka farqadiisa 4aad oo odhaneysaa kheyraadka dalka waxaa masuul ka ah Dawlad dhexe waxayna qaadeysaa talaabo kasta oo suurtagal ah si loo baadho, loogana faa'ideysto kheyraadka ku jira barriga iyo baddaba, ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah iyo sida ugu haboon ee looga faa'ideysan karo, markaa Xeerarka manta idin horyaalaa waa Xeerarka loogu talo-galey in lagu hago

ka faa’ideysiga khayraadka dabiiciga sida baatrooloka iyo macdanta aanu anagu manta maasuulka ka nahay.

Intii ka horeysay shuruucda manta la idiin qeybshaybilaa sharci kumaanu shaqeynayn sida Dastuurku qorayo Qodobkiis a130aad faqradisa 5aad waxay sheegaysaa inta aynu shuruuc ka sameysaneyno waxaynu ka dhaqmeynaa Dawladii aynu ka midka aheyn ee Somaliya laga dhaxlay, markaa sifo sharci daro ah kumaanu shaqeynayn, iminka waxa weeye alxamdulilaah madaama shuruuc ay Somaliland sameysatey oo iyadu diyaargareysatey ay idinkana manta idin horyaalaan oo aanu idiin qaybinay.

Saddexda sharci qaboyo qoraal ee idin horyaalaa waxay ka duulayaan siyaasada Dawladu dajisey oo ay u dajisey ka faa’ideysiga Khayraadka Dabiiciga oo ka ansaxay Golaha Wasiirada Somaliland, saddexdan sharci waxay anaga naga soo gudbeen sanad ka hor, waana ilaahey mahadii hadii manta loo daahfurayo sidii looga doodi lahaa oo sharci looga dhigi lahaa.

Waxa isweydiin leh maxaa mudaddaas dheer ay u suurtoobi wayday in shuruuc lagu shaqeeyo la sameeyo? Intii aan anigu masuuliyada hayay ee aan joogay hawsh iigu horeysay ee aan dedaal ka galey waxay aheyd inaan shuruuc sameeyo, caqabadaha ugu weyn waxa weeye shuruucdan waa shuruuc farsamo ah (technical), dhaqan iyo khibradna uma lihin dal ahaan madaama aynaan shidaal ama macdan aynaan soo saarin waxaanu doorbidey khubaro caalami ah oo waxan nagala shaqeysa inaanu baadi goobno ayay nagu qaadate mudo dheer, waxaanu raadinay dhaqaale aanu khubaro ugu igmano, dhaqaalaha dalkana manta waad ogtihiin, markii dambe ilaahey baa mahad leh waanu ku guuleysaney inaanu dhaqaale u helno khubaro inay hawshan nagala shaqeyso.

Waxaanu markaa igmaney khubaro ka yimi Norway laba shirkadood ee ugu waaweyn xaga looyarnimada ku saabsan shidaalka inay Wasaarad ahaan nala gorfeeyaan oo nalaga shaqeeyaan, waxaanu kala hadleynay maaha inay Xeerkii Norway noo soo koobigareeyaan ee waxa weeyaan in Xeer ku dabaqmaya dhaqanka iyo systemka dalkeena inoo sameeyaan iyagoo eegaya nidaam-yada caalamiga ah ee u yaala hagida ama maamulida petroleum-ka.

Markaa nimankaasi waxay nagala shaqeeyeen Xeerka Shidaalka iyo Xeerka Dakhliga Shidaalka, sababta aanu runtii Norwegian-ka u qaadanay waxa weeye waxay ku xeel-dheer yihiin ama ku nisbaysanyihiin oo lagu tilmaamaa Maamul wanaaga wixii ku saabsan Shidaalka oo Caalamkuna kaga daydaa nidaamyada ay u dejisteen, markaa sababtaas u doorbidnay inaanu maanta in aan norweygin Expert inaan keensano oo ay hawshaa nalaga hawl galaan.

Xeerka Macdanta isaga waxaa nagala shaqaynayay niman Canadian iyo Dalka Australia oo ay ku xeel dheer-yihiin laguna tilmaamo dalalka ugu horeeya ka faa'idaysiga Macaadiinta adag.

Markaas sidaasaanu ugu tilmaamsanay labadaa Experts inay maanta noogala shaqeeyaan.

Lacag badanina ay ku baxday runtii oo maanta ay khubaradaasi ay nagala shaqeeyeen Macdantaas.

Waayo hawshani labo Sano ayay gaadhay hawshan inta sharciga lasamaynayay la Draf garaynayay anagoo nidhi sharciga uun Copy hanaga siinina-e Shuruucdiinee waa inaad ku dabaqdaan Settings-ka ku yaala dalka maanta oo uu ku jiro Somaliland. Markaas Wasaaradu iyo khubaradani waxan iskamay maleegan ee WorkShop ayaanu u qabanay si dadka daneeyayaashu ay qab ka noqdaan, dadka hadhaw xeerka lagu dhaqayaaye, sidoo kale waxaaiyaguna qayb ka ahaa Guddida Khayraadka ee dabiiciga ah si ay nooglaha shaqeeyaan xeerarkaa.

Maanta saddexdan sharci ee aan halkan idiinku soo bandhignay waxaanu jecelnahay iyada oo maanta dalku u baahi weyn u qabo, Saddexdan sharci inla gorfeeyo oo sida ugu dhakhsaha badan laysku dayo in la sharci gareeyo oo uu sharci noqdo.

Waayo dee waxa weeye hawlaa inoo socda iminka Alxamdulilaahi Rabil Caalamiin intaanay waxba inoo soo bixin. Wax khayraad ahna lasoo saarin inaynu shuruuc aynu leenahay oo dalkeenu leeyahay ayaa in oo muhiim ah waxaa jira sharaaik maalgashi doonaya inay sameeyaan waa in la helaa wixii ay ku hawl-gali lahaayeen.

wax-yaabaha ay baadhista ku samaynayaan waxaa ka mid ah macaadinta oo shardi nagaga dhigeen in aan leenahay sharci, waxaananu tusnay oo waxaanu nidhi kaa qadiimiga ayaanu ku dhaqanaa oo mahayno midkale.

sharcigayagii aan samaysanay waxa uu horyaalaa oo gacanta ku haya Golayha Baarlamaanka, markaa waxay yiraahdeen waxaanu jecelnahay inaanu sugno wax maalgashi ah masamayn karno ilaa sharci somaliland leedahay oo Mayni Cod-ka lagu hagayo ilaa inta uu soo baxayo.

Markaa waxyaabo caynkaas oo kale ayaa inagaga xidhan waxaa jira sharaa'ig kale oo daynaynaya inay dalka wax gashaan laakiin waxa ugu horeeya ee ay ku waydiinayaan ayaa ah sharci aad idinku samaysateen ma jiraa.

Sidaas aawadeed waxaan u baahanahay inaan xil iska saarno sida ugu dhakhsaha badan aynu shuruucdaa u samayno.

Shuruucdan qabyo qoraalka ah ee ina horyaalaa xildhibaano waxay ka turjumayaan siyaasadii aan idiin sheegay in dawladu ansixisay dhawr sano horteed.

Sidoo loo maaraynayo ama loo maamulayo khayraadka dabiiciga ah siyaasadaasi qodobada ugu muhiimsani waxa weeye in la maareeyo sacterka khayraadka oo lagu dabaqo qodobka 12$^{aad}$ ee Dastuurku nafarayo.

inaynu ku dayano maamulida iyo hagida ee dabiiciga ah si qaabilsan waafaqsan nidaamyada caalamiga ah ee aduunyadu ku dhaqanto inaynu kaga faa'iidaysano waxna soo saarno horumarino  khayraadkeena inagoo eegayna inaynu uga faa;iidaysanno si masuuliyadi ku dheehan tahay oo aynaan ku tagri falin oo aynu muujino sidii aynu faa'iidada ugu badan uga heli lahayn .

Oo umada somaliland uga wada faa'iidaysan lahayd inagoo khayraadkeena ka faa'iidaysanayna waxa kale oo la doonayaa degaankeenii inaynu ilaashano oo aynaan degaankeenii baabi in.

Waad ogtihiin dalal hore oo baadrool looga soo saaray oo runtii degaanadooda aad iyo aad loogu ciyaaray dhibaatooyin waa weyni ay kasoo gaadheen shidaal soo saarista.

Ma doonayno inaan  kuwaas oo kale aynu noqono waxaynu rabnaa sida xeego xeego ay noqoto ilkana ay u nabad galaan hadaynu macaadiin soo saarno iyo hadii aynu baadrool soo saaraynoba inaynu faadidada aynu ka doonayno inaanay galaafan degaankeena baynu u baahanahay. Waxaynu kaloo doonaynaa inaanay noqon wax laga sheekeeyo ee noqdaan wax inoo hirgala.

Dawladaha africa qaar kamid ah ayay ku dhacday oo markii khayraad usoo baxay faaido ay ka helaan iska daayoo naclad bay ku noqotay waxyaabaha ku dhacay waxaa kamid ah dhaqaalahoodii oo kabmi waayay nidaamkii dawladnimo oo ka xumaaday oo digtaytar isku bedelay maamulkii digtaytar ship isku bedelay iyo horumarkii laga filayay oo laga waayay.

Markaa waxaynu iska ilaalinaynaa dhacdadaa dhacday sidaas awaadeed waa inaynu shuruud waxan xakamaysa oo sugta oo aynu hanaan wanaag iyo maamul wanaag aynu ku dabaqno ayaynu u baahanahay.

Markaa siyaasadahaa ay ka duulayaan shuruucdan maanta ina horyaalaa waa siyaasadaa saddexda qabyo qoraal ee ina horyaalaa hadaan ku horeeyo xeerka shidaalka.

Waxa uu ka kooban yahay **11 qaybood** iyo **73 qodob** ayuu ka kooban yahay way ina horyaalaan wakhti baad ku qaadan doontaan inaad akhridaan ood fanadaad oo lafa gurtaan.

Xeerkaasi wuxuu saamaynayaa oo hagayaa sahaminta baadhista soosaarka iyo ka faaidaysiga shidaalka oo ku yaala oogada dushiisa contration jelka contrationka waxaa la yiraahdaa bada ilaa 12 nootikal maylis raacsanintaas ayuu maanta xeerkani qeexayaa.

Xeerkaasi waxa uu qeexayaa sida liisanada loo bixinayo sida baadhista loo ilaalinayo loo eegayo ee la shirci garaynayo wax soo saarka sida loo qaabaynayo heshiisyada lala gelayo sharaaiga shaqadan qabta maanta waxyaabo caynkaas ah ayuu ka hadlayaa.

Shaqadu marka ay bilaabmato ee wax soo saarku bilaabmo sida loo maaraynayo sida maanta loola xisaabtamayo sharaaiga wax soo saarayay sida loo maaraynayo sihamintiisa iyo wax soo saarkiisa iyo ka faaidaysigiisaba.

Xeerka kale ee ku xiga ee lamaanaha ku ah xeerka shidaalka waa xeer runtii markii aanu eegnay wakhtigiisii aan joogin waayo dee marka aynu baadrood dhoofino berbara ama dekad kale hadba meeshii laga dhoofinayo.

Oo uu baadroolkeenu uu gaadho suuqyada caalamiga ah maanta ma joogno waayo waa inagan baadi goobkii ugu horeeyay ku jirna laakiin anigu waxaan is idhi mar hadii uu dalkani uu dal curdun ah uu yahay, dal soo kacaya uu yahay waxa uu u baahan yahay in laga sii hordego intaan wax inoo soo bixinba oo sharcigaa saamaynaya xakamaynaya ee lagu dhaqmayo loo qaabayn lahaa dakhliga kasoo baxayaa xeerkaas sidii loo maamuli lahaa.

Xeerkaasi wuxuu sheegayaa hadii illaahay ina gaadhsiiyo aynu wax lasoo baxno oo aynu wax dhoofino oo aynu baadrool lasoo baxno in dakhligaa ina soo galay.

aanuu noqon marba dawlada joogtaa aanuu noqon inay siday doontaa ay ugu tagri fashaa dawladu waa ay xumaan kartaa waana ay wanaagsanaan kartaa isku halayn masiin kartid oo ma odhan kartid dawlad wanaagsan ayaanu leenahay. Waanu ognahay wadamo badan oo aduunyada ahi inay tagri fal badani inuu ku dhacay.

Khayraadkii dalka kasoo baxayay oo aan sifiican looga faaidayn markaa runtii waxaa la doonayaa xeerkaasi inuu xakameeyo.

Waxa uu noqonayaa xeer soo baxay oo qaanuun ah ayuu noqonayaa maaha wax dawladi wax ku samayn karto oo ay tiraahdo intaasna waxaasaan ku samaynaynaa intaasna waxaasaanu ku samaynaynaa.

Dakhligaa inooga soo baxay baadroolka inteebaa degaanada uu kasoo baxayo aad baa looga hadlaa degaanada  maxaa siinayaa anaku xeerarka ma dejinee waan idiin keenaa waa uu idin horyaalaa .

Waxa loo qoondaynayo degaanka ay wax kasoo baxayaan waa uu idiin yaalaa waxa loo qoondaynayo degaanka ay wax kasoo baxayaan idinkaa maanta saamayn leh waxaanu ka dhignay Black maxaa degaanka uu kasoo baxayaa loogu tala gelayaa.

Maxaa Gobolka uu kasoo baxayaa loogu tala gelayaa taa idinkay idiin taalaa inaad xadidaan maxaa la siinayaa degaanada ay wax kasoo baxaan xaqna waa ay u mutaysanayaan maadaama degaankii ay wax kasoo baxayeen .

Xaqna waa ay u mutaysanayaan maadaama deegaanka ay waxkasoo baxayaan ay hawshii iyo dhibaatadii ay ku dhacayso waa inay si gaar ah  tixgelin gaar ah lasiiyaa ay ku horumaraan micnaheedu maaha lacag in loo qaybiyo dadka shicibka ah waxa weeye

horumarka  Distari-guu kasoo baxayay iyo gobolkuu kasoo baxayayba loogu talagalo ay dawladu horumar ay ugu samayso.

Degaanadii ay waxani kasoo baxayeen markaas xeerku waa xadidayaa intaas iyo intaas beersantayjkaa waxaa loogu tala gelayaa horumarinta distraygaa intaas waxaa loogu tala gelayaa Gobolka uu kasoo baxay.

Intaas waxaa loogu tala gelayaa Miisaaniyada markaas dawladaa  jirta inay maamulkuu dalka ay kaga shaqayso horumarka dalka kaga shaqayso  intaas waxaan ugu tala galaynaa  jiilasha inoo soo socda Mustaqbalka ah ugu tala galno oo aynaan wixii inagu wada cunin.

Hadaan hada matal ku siiyo Dawlada Norwey dakhliga oo intiisa badan ka yimaada baadroolka wuu dhitaystaa maba cunoba wuxuu kaloo cunaa oo uu ka faaidaystaa oo uu isticmaalaa lacagta uga soo baxaysa marka lacagtaasi maalgashiga ay samaynayo.

Ayuu cunaayoo uu ka faaidaystaa inta kale waa u dhito

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| --- | --- |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------------- | ---------------------------------------------- |